



**Taariikh:** Agoosto 15, 2020

## **BAAQA GUDDIGA JOOGTADA EE AQALKA SARE**

Guddiga Joogtada ah ee Golaha Aqalka Sare, kulankiisa seddexaad, Kalfadhiga 7aad ee maanta oo ay taariikhdu tahay **15 Aug. 2020**, isaga oo xoojinaya dedaalka Golaha Aqalka Sare uu ku bixiyay dib-u-bilaabashada wada-hadallada Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada isla markaasna bogaadinaya warmurtiyeedyadii ka soo baxay Shirarkii Dhuusamareeb I iyo II, Guddigu wuxuu ku guddoonsaday kulankiisa qodobbada soo socda:

- Waxaan ku bogaadinaynaa Dowlad Goboleedka Galmudug iyo Shacabweynaheeda gogosha Soomaaliyeed ee ay u fidiyeen mas’uuliyiinta labada heer dowladeed si ay uga wada-hadlaan arrimaha masiiriga ah ee Qaranka.
- Waxaan ugu baaqaynaa mas’uuliyiinta labada heer dowladeed ee u madlan in ay isugu yimaadaan Shirka Dhuusamareeb III oo ku astaysanaa maanta 15 Agoosto 2020 in laga wada shaqeeyo sidii uu u qabsoomi lahaa shirkaas isla markaasna ahmiyad gaar ah la siiyo ka qeygalkiisa.
- Waxaan u soo jeedinayaa, annaga oo maanka ku hayna ahmiyadda uu shirkaasi u leeyahay Ummadda Soomaaliyeed xilligan kala guurka ah, in mas’uuliyiintu ka miro-dhaliyaan shirkaas laguna soo soo saaro go’aanno dhaxalgal ah oo Dalka ka samatabixiya xaaladdaan ka guurka ah.

=DHAMMAAD=